Casharka 26

1. Yaa Fircoon riyada u muujiyey?
-Ilaah.

2. Maxay ahayd riyadii kowaad ee Ilaah u muujiyey Fircoon?
-Toddobadii sacaadee caatada ahaa ee cunayey Toddobadii sacaad ee buurbuurnaa.

3. Maxay ahayd riyadii labaad ee Ilaah u muujiyey Fircoon?
-Toddobadii sabuul ee gallayda ahaa ee qalalnaa, oo cunaya toddoba sabuul oo waaweyn, ama cayilan.

4. Yuu ahaa kii Yuusuf siiyey fahamka riyadii Fircoon?
-Ilaah.

5. Maxay ka macne ahaayeen labadii riyo ee Fircoon?
-Toddoba sannadood oo aaran ah, iyo toddoba sannadood oo abaar ah.

6. Miyaa Ilaah awood u leeyahay inuu hago dadka isaga aan rumaysnayn?
-Haa.

7. Sidee baa Ilaah ku kaamilay riyadii Ilaah kal hore u muujiyey Yuusuf markii uu yaraa?
-Ilaah wuxuu Y uusuf ka dhigay boqor u taliya dhulka Masar.

8. Maxaa Yacquub reerkiisii oo dhan u geeyey dhulkii Masar?
-Waayo Yuusuf wuxuu ku noolaa dhulkii Masar.

-Waayo waxaa dhulka Masar yiillay cunno aad u badan.



-Markii Y acquub iyo wiilashiisa iyo qoysikiisa oo dhan ay soo degeen dhulkii Masar, toddobaatan qof bay ahaayeen.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 1:1-5

1-Haddaba waa kuwan magacyadii wiilashii Israa'iil, oo Masar yimid; nin walba iyo reerkiisiiba waxay la yimaadeen Yacquub.
2-Ruubeen, Simecoon, Laawi iyo Yahuudah,
3-Isaakaar, Sebulun, iyo Bnyamiin,
4-Daan iyo Naftaali, iyo Gaad iyo Asheer.
5-Oo dadkii ka soo go'ay xanjaadkii Yacquub oo dhammu waxay ahaayeen toddobaatan qof; Yuusufna Masar buu markii hore joogay.

-Muxuu ahaa magacii cusbaa ee Ilaah siiyey Yacquub?
-Israa'iil.

-Wixii ka soo farcamay Ibraahim, Isxaaq; iyo Yacquub ayaa iyana la oran jiray Israa'iil, ama reer binu Israa'iil.

-Yacquub, iyo wiilkiisii Yuusuf, iyo walaalihiis, iyo reerahoodiiba sannado badan bay Masar ku noolaayeen.

-Markii abaartii dhammaatay ayaa Yuusuf iyo walaalihiisba ay sii joogeen dhulkii Masar, oo halkaasay ku noolaayeen.

-Aabbahood Yacquub wuu dhintay, Yuusuf iyo walaalihiisna dhulkii Masar ayey ku noolaayeen.

-Dabadeedna, Yuufus iyo walaalihiis way wada dhinteen, reer binu Israa'iilna dhulkii Masar ayey ku noolaayeen.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 1:6

6-Yuusuf, iyo walaalihiis, iyo farcankaas oo dhanba way wada dhinteen.

-Maaddaama aanay reer binu Israa'iil dib ugu noqon dhulkii Kancaan, waxay iska sii joogeen dhulkii Masar sannado badan, oo waxay noqdeen quruun fara bdan.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 1:7

6-Oo reer binu Israa'iilna waa bateen, oo aad bay u kordheen, wayna ftarmeen, oo aad iyo aad u xoog-aysteen; dhulkiina way buuxiyeen.

-Fircoonkii Cuusbaa ma noqon mid naxariis badan oo la mid ah Fircoonkii talinayey wakhtigii Yuusuf.

-Fircoonkan cusub wuxuu ahaa mid shar badan.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 1:8-11

8-Haddaba Masar waxaa ka kacay boqor cusub oo aan Yuusuf aqoonin,
9-Markaasuu wuxuu dadkiisii ku yidhi, Bal eega, dadkii reer binu Israa'iil waa inaga badan yihiin, wayna inaga xoog weyn yihiin.
10-Kaalaya, aynu si caqli ah ula macaamiloonnee; waba intaasoo ay tarmaan, oo ay markuu dagaal dhaco cadaawayaasheenna inoogu darmadaan, Oo intay inala diriraan ay dalka ka baxaane.
11-Haddaba sidaas daraaddeed ayay niman madax uga



dhigeen si ay culaabtooda ugu dhibaan, oo waxay Firccoon u dheseen magaalooyin wax lagu kaydiyo oo la yiraahdo Fitom iyo Racamses.

-Maxaa kale ee Faraaciyiintii cusbaa ku sameeyeen Israa'iil.
-Reer binu Israa'iil oo dhan ayuu addoommo ka dhigay.

-Muxuu Fircoon reer binu Israa'iil addoommo uga dhigay?

-Fircoon wuxuu ka baqay in reer binu Israa'iil ay qaataan dhulkan?

-Muxuu Fircoon kaga baqay ama uga cabsaday in reer binu Israa'iil qaadan doonaan dhulkiisa.

-Waayo reer binu Israa'iil way tarmeen, oo waxay noqdeen quruun.

-Yaa ku hoggaamiyey fircoon inuu gumaysto reer binu Israa'iil?
-Shayddaan.

-Maxaa Shayddaanku u doonayaa inuu u burburiyo Israa'iil?

-Waayo Shayddaanka wuxuu garanayey in Ilaah soo dirayo Badbaadiyaha, oo uu ka soo dhex daahiriyo Israa'iil.

-Shayddaanka wuxuu neceb yahay Ilaah.
-Shayddaanku wuxuu kaloo neceb yahay dadka oo dhan.

-Shayddaanku ma uusan doonaynin in Badbaadiyuhu ka yimaado reer binu Israa'iil.

-Shayddaanka ma uusan doonaynin inuu Badbaadiyuhu yimaado

oo uu dadka badbaadiyo.

-Shayddaanku wuuu neceb yahay dadka ood han.
-Shayddaanku dooni maayo inuu dhegaysto ama maqlo farriinta Ilaah.

-Shayddaanku wuxuu doonayaa in idinka oo dhan aad gashaan Harada dabka ah.

-Inkastoo Shayddaanku uu doonayo inuu Israa'iil burburiyo, haddana Ilaah baa daafacayey.

-Inkastoo Shayddaanku doonayey inuu burburiyo Israa'iil, Ilaah baa iyagii barakadeeyey ama badiyey.

-Maxaa Ilaah u barakadeeyey Israa'iil?
-Waayo Ilaah baa jeclaaday Israa'iil.

-Waayo Ilaah jebin maayo ballankii uu la dhigtay Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 1:12-14

12-Laakiinse in kastoo ay aad u dhibeen, haddana aad bay u sii tarmeen, oo aad bay u faafeen, Oo reer binu Israa'iil aawadood ayay la murugays-naayeen.
13-Oo Masriyiintiina waxay reer binu Israa'iil ku qasbeen inay qaxar ku adeegaan.
14-Oo waxay naftoodii ku dhibeen hawl aad u adag, oo ahayd dhoobo la qaso, iyo leben, iyo hawl kasta oo beeraha laga qabto, oo hawl kastoo ay ku qasbeen inay qabtaanba way ku qaxri jireen.



-Weliba Fircoon wuxuu qaxray Israa'iil wax badan, Ilaahna aad iyo aad buu u barkadeeyey Israa'iil.

-Haddaba maalin maalmaha ka mid ah, ayaa Shayddaanka fikir kale oo shar ah geliyey Fircoon.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 1:15-22

15-Markaasaa boqorkii Masar wuxuu la hadlay umulisooyinkii Cibraaniyadaha ahaa, oo middood magaceeda Shifraah la odhan jiray, tan kale magaceedana Fuwah la odhan jiray.
16-Oo wuxuu ku yidhi, Markii aad umulinaysaan naagaha Cibraaniaydaha, oo aad aragtaan iyagoo gambarka umusha fadhiya, haddii uu wiil yahay, waa inaad dishaan, haddayse gabadh tahay, ha iska noolaato.
17-Laakiinse umulisooyinkii Ilaah bay ka cabsadeen, mana ay samayn wixii boqorkii Masar ku amray, ee way badbaadiyeen carruurtii labka ahayd.
18-Markaasaa boqorkii Masar u yeedhay umulisooyinkii, oo ku yidhi, Maxaad waxan u samayseen, oo aad u badbaadiseen carruurtii labka ahayd?
19-Markaasaa umulisooyinkii waxay Fircoon ku yidhaahdeen, Maxaa yeelay, naaga Cibraaniyaduhu la mid ma aha naagaha Masriga, oo waa ka dhaqso badan yihiin, oo intii aan umulisooyinku u iman bay umulaan.
20-Haddaba Ilaah si wanaagsan buu u sameeyey umulisooyinkii, dadkiina waa tarmay, oo aad bay u xoogaysteen.
21-Oo waxay nototay, in Ilaah umulisooyinkii reero u yeelay, maxaa yeelay, Ilaah bay ka cabsadeen.
22-Markaasaa Fircoon wuxuu dadkiisii ku amray, oo ku yidhi, Wiil kasta oo dhasha waa inaad webiga ku tuurtaan, laakiin

gabadh kasta waa inaad badbaadisisaan.

-Muxuu ahaa fikirkii kale ee shayddaanku u soo gudbiyey Fircoon?

-Shayddaanka wuxuu fircoon siiyey fikirkii ahaa in reer binu Israa'iil oo dhan la wada laayo.

-Miyaa Ilaah garanayaa in Shayddaanku qorsheeyey inuu baabi'iyo Israa'iil?
-Haa.

-Miyaa Ilaah oggolaanayaa inuu burburiyo reer binu Israa'iil?
-Maya.
-Ilaah wuxuu ilaalinayaa oo daafacayaa Israa'iil.

-Ilaah wuxuu kaloo qorshaynayaa inuu Israa'iil Masar ka soo wado, oo ku soo celiyo dhulkii Israa'iil.

-Ilaah wuxuu kaloo qorshaynayaa inuu Israa'iil ka wado dhulka Masar, oo uu ku soo celiyo dhulkii kancaan iyadoo uu hor-kacayo Muuse.

-Waxaa halkan ka bilaabanaya qisadii Muuse:

Bal aynu akhrinno Baxniintii 2:1-4

1-Markaasaa waxaa tegey nin reer Laawi ah , oo wuxuu guursaday gabadh reer Laawi iyana ah.
2-Markaasay naagtii uuraysatay oo waxay dhashay wiil, oo markay aragtay inuu ilmo wanaagsan yahay, ayay qarisay in saddex bilood ah.



3-Oo markay in dambe qarin kari weyday, ayay waxay soo qaadday abxad caws duur ah, oo intay dhoobo iyo daamur ku malaastay ayay wiilkii ku ridday, oo waxay dhex gelisay duur webiga qarkiisa ka baxay.
4-Walaashiisna waxay taagnayd meel ka fog, inay ogaato wixii isaga lagu samayn lahaa.

-Muuse aabbihii iyo hooyadii waxay rumaysnaayeen Ilaah.

-Muuse aabbihii iyo hooyadii waxay rumaysnaayeen in Ilaah daafici doono dhallaankooda.

-Sidaas daraaddeed, Ilaah wuxuu siiyey iyaga fikirka ah inay dhallaankii Muuse ahaa dembiil geliyaan, iyo inay geliyaan dembiisha webiga Niil.

-Miyaa Ilaah daafacay wiilkoodii9 Muuse ahaa?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 2:5-10

5-Markaasaa gabadhii Fircoon webiga timid inay ku maydhato gab, Gabdhihii addoommada u ahaana waxay socdeen webigii dhinaciisa. Markaasay iyadii waxay aragtay abxadda duurka ku dhex jirta, oo waxay u dirtay gabadhii addoonka ahayd inay u keento.
6-Markaasay furtay, oo waxay aragtay wiilkii; oo bal eeg, yarkii waa ooyay. Kolkaasay u naxariisatay, oo waxay tidhi, Kanu waa carruurtii Cibraaniyada midkood.
7-Markaasaa walaashiis waxa gabadhii Fircoon ku tidhi, Ma kuugu yeedhaa naagaha Cibraaniyadaha middood inay kuu nuujiso ilmaha?
8-Gabadhii Fircoonna waxay ku tidhi iyadii, Haah, tag

gabadhiina way tagtay oo waxay u yeedhay yarkii hooyadiis.

9-Markaasaa gabadhii Fircoon waxay ku tidhi iyadii, Tag, oo ilmahan qaad oo ii nuuji, oo anna waxaan ku siin doonaa mushaharadaada. Markaasay naagtii yarkii qaadday oo nuujisay.

10-Yarkiina waa koray, markaasay u keentay gabadhii Fircoon, oo wuxuu u noqday wiilkeedii. Oo waxay magaciisii u bixisay Muuse, oo waxay tidhi, Maxaa yeelay, anaa biyihii ka soo bixiyey.

-Ilaah wuxuu soo diray gabadhii Fircoonkii dulliga ahaa si ay u daafacdo Muuse.

-Ilaah wuxuu soo diray Fircoonkii dulliga ahaa gabadhiisa si ay Muuse u korsato.

-Muusena wuxuu la noolaa Fircoonkii dulliga ahaa iyo gabadhiisa.

-Waa maxay sababta Ilaah gabadhii Fircoon u soo dirayo si ay Muuse u koriso?

-Waayo Ilaah wuxuu qorsheeyey inuu reer binu Israa'iil ka saaro dhulkii Masar iyadoo uu hoggaaminayo Muuse?

-Waayo wuxuu Ilaah qorsheeyey inuu reer binu Israa'iil ka wado addoonsigii Masar, isagoo isticmaalaya Muuse.

-Ilaah wuxuu garanayey in Muuse ku badbaadayo gurigii Fircoon.

-Wuxuu Ilaah garanayey marka Muuse joogo guriga Fircoon inuu baran doono sida wax loo akhriyo iyo sida wax loo qoro.

-Ilaah wuxuu garanayey in Muuse waxyaaba kale oo badan ka



baran doono gurigii Fircoon kuwaasoo gacan ka geysanaya hoggaaminta reer binu Israa'iil.

-Fircoon wuxuu doonayey inuu baabi'iyo Israa'iil, laakiin Ilaah waa daafacay iyaga.

-Miyaa cidi istaajin kartaa hawsha Ilaah?
-Maya.

-Shayddaanka iyo jinniyadiisu waxay doonayeen inay Isra'aiil baabi'iyaan, laakiin Ilaah waa daafacay.

-Miyaa jinnigu istaajin karaa hawsha Ilaah?
-Maya.

-Miyaa Shayddaanku istaajin karaa hawsha Ilaah?
-Maya.

-Ilaah waa Qaadir.

-Ilaah wuxuu daafacay Israa'iil, wuxuu kaloo daafici doonaa kuwa isaga rumaysta oo dhan.

-Muuse wuxuu ku koray gurigii Fircoon, ilaa uu nin weyn noqday.

-Maalin, ayaa Muuse dibadda u baxay si bal uu u arko waxa ku dhacaya Israa'iil iyo dhibaatada addoonsiga ee lagu hayey.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 2:11-14

11-Oo waayahaas, markii Muuse weynaaday, waxay noqotay inuu walaalihiis u soo baxay, oo uu fiiriyey culaabta

saaran.  Markaasuu wuxuua rkay mid Masri ah oo dilaya mid Cibraani ah oo walaalihiis ka mid ah.

12-Markaasuu iska fiiriyey xagga iyo xagga, oo markuu arkay inaan ciduna joogin ayuu Masrigii kaw kaga siiyey, oo ciidda ku qariyey.

13-Markaasuu haddana maalintii labaad soo baxay, oo wuxuu arkay laba nin oo Cibraaniyo ah oo isla diriraya; oo ku gar darnaa buu wuxuu ku yidhi, War maxaad u dilaysaawadaygaa?

14-Markaasuu wuxuu yidhi, Bal yaa amiir iyo xaakin nooga kaa dhigay?  Ma waxaad doonaysaa inaad ii disho sidaad u dishay Masrigii?  Markaasaa Muuse cabsaday, oo wuxuu isyidhi, Hubaal wixii waa la ogaaday.

-Miyaa reer binu Israa'iil awoodeen inay ka badbaadaan Fircoon?
-Maya.

-Muuse wuxuu isku taxluujiyey inuu reer binu Israa'iil ka badbaadiyo Fircoon, markaasuu dilay hal nin oo Masri ah.

-Laakiin Fircoon wuu ogaaday in Muuse dilay nin Masri ah.

-Muuu Fircoon sameeyey?

Bal aan akhrinno Baxniintii 2:15

15-Haddaba markii Fircoon waxaas maqlay, ayuu wuxuu doondoonay inuu Muuse nafta ka qaado, Laakiinse Muuse waa ka cararay Fircoon hortiisii, oo wuxuu degay dalkii Midyaan, oo ceel buu ag fadhiistay.
-Fircoon wuxuu ogaaday in Muuse dilay nin Masri ah.

-Maraakaas fircoon isku dayey inuu dilo Muuse.



-Muusena aad buu u baqay, oo wuu iska cararay.
-Muuse wuxuu u baxsaday dhulkii reer Midyaan.

-Miyaa Muuse awooday inuu reer binu Israa'iil ka badbaadiyo Fricoon?
-Maya.

-Muuse wuxuu isku dayey inuu reer binu Israa'iil ka badbaadiyo Fircoon, laakiin taas ma uusan awoodin.

-Yuu ahaa kan keliya ee awooday inuu Israa'iil ka badbaadiyo Fircoon?
-Ilaah.

-Isla sida reer binu Israa'iil uu u qabsaday Fircoon , ayaa Shayddaankuna  dadka oo dhan maxbuus ahaan ku haystaa.

-Isla sida reer binu Israa'iil ayan u awoodin inay ka baxsadaan Fircoon, ayaa dadka oo dhaniba awoodaynin inay iska badbaadiyaan Shayddaanka.

-Isla sida Muuseba u awoodi waayey inuu Fircoon ka badbaadiyo reer binu Israa'iil, ayaan la helaynin cid awood u leh inay inaga samatabbixiyo Shayddaanka.

-Isla sida Ilaah u awooday inuu reer binu Israa'iil Fircoon ka badbaadiyo, ayaa Ilaah oo keliya dadka oo dhan ka badbaadin karaa Shayddaanka.

-Casharka xiga kan, ayaannu ku baran doonnaa wax badan oo Muuse khuseeya.